Sookoobista Cilmi-baarista Mustaqbalka Miisaaniyadaha Caalamiga ee CCO-ga

Ka Dhaafida Shuruudaha Cilmi-baaris ee 1115

Sookoobista Codsiga

Gobolka Oregon wuxuu dib u ballanqaadi doonaa heerka kobaca waara ee dhanka barnaamijka CCO-ga si loo helo keydad lacageed, iyadoo laga duulayo miisaaniyad caalami ah oo la xoojiyay taasoo sare u qaadaysa kharash gareynta dabacsan, ee casriga ah. Ballanqaadkan waxaa lagu lammaaneyn doonaa istaraatiijiyado dheeraad ah oo lagula xisaabtamayo CCO-yada baahiyaha xubinta iyo bulshada si diirada loogu saaro si wax-ku-ool ah xaqsoorka caafimaadka iyo dib-u-qeybinta awoodda maadaama uu la xiriiro maalgashiga bulshada.

Dhibaatada iyo Araarta

Ballanqaadka gobolka Oregon ee kobaca waara waxaa loogu talagalay inuu horseedo dhimista kharashaadka ee natiijooyinka caafimaad ee la wanaajiyay iyo kharash gareynta waxtarka badan leh, halkii laga yareyn lahaa adeegyada xubnaha ama la adkeyn lahaa u-qalmida. Qeyb muhiim ah ayaa ah lacago dabacsan, lagu dhafay adeegyada oo loogu talagalay CCO-yada – sidoo kale loo yaqaano miisaaniyad caalamiga ah.

Marka loo eego miisaaniyadaha caalamiga ah, CCO-yada ayaa mas'uul ka ah isuduwida daryeelka oo dhan ee adeegyada caafimaadka jirka, dabeecadda, iyo afka. Waxay sidoo kale leeyihiin dabacsanaan si ay u maalgeliyaan adeegyada kale ee wanaajiya caafimaadka xubinta iyo bulshada, sida guriyeynta ama taageerooyinka cunto, iyadoo loo marayo barnaamijka halabuurka leh ee la xiriira adeegyada caafimaadka (HRS) ee Oregon. Taariikh ahaan miisaaniyadaha caalamiga ah ee CCO-yada sidoo kale waxaa lagu soo daraa lacag badan oo ku xiran tayada, taasoo u dhaxaysa 2% ilaa 4.25% miisaaniyada caalamiga ah ee la siiyo CCO-yada. Dhiirrigelinadaan ayaa horseeday horumaro la taaban karo oo laga gaaray tayada daryeelka; tusaale ahaan, inta u dhaxeysay 2011 iyo 2019, baaritaanada niyadjabka ayaa kordhay in ka badan laba-laab oo adeegsiga waaxda gurmadka degdega ah ayaa hoos u dhacay 14%. Inkastoo qaar ka mid ah CCO-yada ay si guul leh u qorsheeyeen geedi-socodyada lagu hubinayo in maalgashiyada caafimaadka bulshada ay maareeyaan oo ay go'aamiyaan xubnaha bulshada iyo ururada bulsheed laftooda, qaar badan oo ka mid ah CCO-yada ayaa leh go'aan qaadasho dhexe oo ku ekeenaysa awoodda CCO-ga marka ay timaado maalgashiga bulshada.

Miisaaniyadda caalamiga ah ee Oregon, HRS, iyo barnaamijyada tayada leh ayaa fure u ahaa joogteynta kobaca waara iyadoo la wanaajinayo caafimaadka. Si kastaba ha noqotee, caqabado la taaban karo ayaa weli jira. Daryeelka caafimaadka ayaa wali ah midka ay ku baxaan kharashaadka ugu badan ee la taaban karo ee miisaaniyadda gobolka Oregon. Isla mar ahaantaas, Reer Oregon waxay wajahayaan dhibaato xagga guriyeynta ah oo ka jirta gobolka oo dhan, xaaladaha degdega ah ee cimilada joogtada ah ee ay keenaan isbeddelada cimileed, iyo xaqsoor la'aanta baahsan ee ka dhalata cunsuriyadda nidaamsan.

Inkastoo CCO-yada ay haystaan dabacsanaan iyo dhiirrigelin kordhaysa si ay lacag ugu bixiyaan adeegyada la xiriira caafimaadka, inta badan CCO-yada weli waxay ku bixiyaan wax ka yar 0.5% miisaaniyadooda caalamiga ah adeegyada u-qalma. Tani waxay qayb ka tahay xaddidaadaha la saaray sida kharashaadka loo kala sooco loona qiimeeyo. Waxaa sidoo kale ka jira farqiyo waaweyn oo u dhexeeya lacagta lagu bixiyo caafimaadka habdhaqanka, gaar ahaan marka laga hadlayo carruurta leh baahiyaha adag iyo dadka wajahaya xaqsoor la'aanta caafimaadka. Isla mar ahaantaas, lacago aad u tiro badan ayaa loo kharash gareeya si aan wax-ku-ool iyo waxtar lahayn, oo ay keeneen arrimo raagay oo ku saabsan bixinta daryeelka, daryeelka isku xiran, daaweynta xad-dhaafka ah, iyo maareynta adag.

Waxaa ugu daran, inkastoo guulo laga gaaray guud ahaan tayada daryeelka caafimaadka, xaqsoor la'aanta caafimaad ee la taaban karo ee sii socota.

Tobbankii sanno ee la soo dhaafay, Oregon wuxuu habbeyay miisaaniyadiisa caalamiga ah wuxuuna dejiyay geedi-socodyo dhowr qaab leh iyadoo la isku dayayo in si wanaagsan loo abaalmariyo daryeelka tayada iyo natiijooyinka leh, iyadoo la ilaalinayo heerka kobaca waara. Tusaale ahaan, qeyb ahaan ka dhaafida shuruudaha cilmi-baarista ee 1115, Oregon waxaa loo helay oggolaansho hab hal-abuur leh oo lagu beddelayo faa'iidada saafida ah ee CCO-ga ee ku saleysan maalgashiga kordhay ee adeegyada la xiriira caafimaadka iyadoo la gaarayo bartilmaameedyada tayada iyo kharashyada ku baxaya. Barnaamijkan, oo hadda loo yaqaano Abaalmarinta Ku Saleysan Waxqabadka (PBR), dhaqangal ayuu noqon doonaa laga bilaabo heerarka CCO-yada ee 2022. Inkastoo Oregon uu bilaabay inuu gaaro kordhinta maalgashiga adeegyada ee la xiriira caafimaadka ee CCO-yada sannadka 2020 iyadoo ugu wacan yahay PBR, isbeddelo badan ayaa loo baahan yahay si loo gaaro caqabadaha iyo taxaddiyada Oregon ay wajahayso.

Himilada, Hadafyada iyo Geedi-socodka:

Himilada: CCO-yada Oregon waxay haystaan dabacsanaan, dhiirigelin dhaqaale, iyo la xisaabtanka bulshada ee lagama maarmaan u ah wax ka qabashada baahiyaha caafimaad iyo bulsho ee xubnaha, maalgashiga caafimaadka bulshada iyo badqabka, iyo ciribtirka xaqsoor la'aanta caafimaadka ee Oregon.

Hadafyada

- Gobolka Oregon wuxuu abuuraa keydad lacageed oo wax looga qaban karo xaqsoor la'aanta caafimaadka ee ka jira gobolka, iyadoo la ilaalinayo heerka kobaca waara ee ku jira barnaamijka CCO-ga
- CCO-yada waxay diirada saarayaan lacag ku kharash gareynta lacag xaqsoorka caafimaadka, kahortagga, isuduwida, iyo tayada daryeelka – maxaa yeelay kuwaani waa maalgashiyo casri ah oo ka caawin doona iyaga inay joogteeyaan kobaca kharashaadka waara.
- Bulshooyinku wax badan ayay ka qaataan go'aamada kharashka ee saameynaya iyaga, gaar ahaan marka laga hadlayo xaqsoor la'aanta caafimaadka
- Dadka, gaar ahaan kuwa ay la soo deristo xaqsoor la'aanta caafimaadka, waxay helaan daryeelka iyo taageerooyinka ay u baahan yihiin si ay u ahaadaan caafimaadqab, oo ay ku jiraan adeegyada wax looga qabanayo baahiyaha bulshada eela xiriira caafimaadka

Geedi-socodka iyo Istaraatijiyadaha Suurtogalka ah ee Lagu Gaarayo Hadafka

Tallaabooyinka hoose waxay tilmaamayaan geedi-socodka loo baahan yahay si loo gaaro hadafyada. Nidaamkan waxaa la gaari doonaa iyadoo la isku darayo istaraatiijiyado ka dhaafid iyo ka dhaafid la'aan.

Tallaabada 1-aad: Ha noqdo barnaamijka CCO-ga mid leh bartilmaameedka kobaca kharashka waara iyadoo la waafajinayo dadaallada ka jira gobolka oo dhan si loo xakameeyo kharashaadka daryeelka caafimaadka.

Hadafyada kobaca kharashka waara ee Oregon waxay qeyb ka yihiin dadaalka ka jira gobolka oo dhan oo ay ka mid yihiin CCO-yada, qorshooyinka ganacsiyeed, iyo qorshooyinka caafimaadka bulshada, oo ujeeddadeedu tahay ka abuurista keydad lacageed gobolka oo dhan si wax looga qabto baahiyaha kale ee gobolka. Gaarista kobaca waara ee nidaamka daryeelka caafimaadka ayaa kara dhigaalin doona kheyraadka muhiimka ah ee loo baahan yahay si loo saxo midabtakoorka taariikhiga ah, isku dheelitirnaan la'aanta awoodeed, iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka. Isla mar ahaantaas, bartilmaameedka kobaca kharashka waara, marka loo geeyo tallaabooyinka kale ee geedi-socodkan, waxay abuuri doonaan dhiirigelin loogu talagalay CCO-yada si ay diirada u saaraan xaqsoorka caafimaadka, kahortagga, iyo adeegyada tayada sare leh ee aan ognahay inay dhimaan kharashaadka.

Tallaabada 2-aad: Adeegso habab hal-abuur oo casri ah si aad u dejiso miisaaniyado caalami ah oo dhiirigeliya hufnaanta iyo kor u kaca maalgashiga.

Iyadoo lagu saleynayo waxyaabaha loo “cuskan” doono heerarka mustaqbalka, CCO-yada weli waxay haystaan dhiirigelin aad u tiro badan si ay ugu tiirsanaadaan adeegyada daryeelka caafimaadka ee caadiga ah, halkii ay ka jawaabi lahaayeen baahiyaha ugu daran ee xubnaha iyo bulshada. Tani waxay si gaar ah run u tahay marka laga hadlayo wax ka qabashada baahiyaha bulshada ee la xiriira caafimaadka, kuwaasoo inta badan aan si fiican loo adeegsan maadaama loo xisaabiyo si ka duwan adeegyada daryeelka caafimaadka. Hadafka Oregon waa in la horumariyo miisaaniyadaha caalamiga ah ee mustaqbalka oo ay ku jiraan dabacsanaanta buuxda ee loogu talagalay CCO-yada si loogu helo dhammaan xubnaha daryeelka ay u baahan yihiin si ay u ahaadaan caafimaadqab. Intaas waxaa sii dheer, miisaaniyaduhu waa inay ka koobnaadaan dhiirigelin cad si loogu adeego baahiyaha xubinta, si ay u noqdaaan kuwo sida ugu fudud ee ugu suurtogalka ah loo fahmo, isla markaana u noqdaan kuwo ay sii saadaalin karaan bulshooyinka iyo gobolka.

Tallaabada 3-aad: Kordhi la xisaabtanka CCO-ga ee bixinta daryeelka iyo taageerida baahida xubnaha

Kordhinta dabacsanaanta miisaaniyadeed iyo hadafyada bartilmaameedka kobaca waara waxaa loogu talagalay inay weeciyaan kheyraadka si loogu daboolo si fiican baahida bukaanka iyo bulshada. Si kastaba ha noqotee, isku darka dabacsanaanta iyo cadaadiska kharash keligood ma xaqiijin karaan in CCO-yada adeegsan doonaan dabacsanaanta si ay ugu adeegaan xubnaha iyo bulshada. Oregon wuxuu sii wadi doonaa inuu la xisaabtamo CCO-yada si ay u bixiyaan macaashyada kunturaad ahaan waajibka ku ah iyo inay gaaraan tayada aasaasiga ah iyo bartilmaameedyada helitaanka, xitaa marka la rabo CCO-yada ay adeegsanayaan dabacsanaanta si ay kheyraadka u weeciyaan si kor loogu qaado loona bartilmaameedsado xaqsoor la'aanta caafimaadka. Oregon wuxuu ka shaqeyn doonaa inuu kordhiyo helitaanka joogtada ah ee adeegyada muhiimka ah, sida macaashyada farmashiyaha, gaar ahaan kuwa loogu talagalay dadka qaba xaaladaha caafimaad ee habdhaqanka. Oregon sidoo kale waxay higsaneysaa inay xoojiso ama balaariso farsamooyinka jawaab-celinta, si tabashooyinka ka imanaya bixiyeyaasha, u-doodeyaasha iyo xubnaha bulshada ee ku saabsan bixinta CCO-yada ee macaashyada aasaasiga ah in si habboon wax looga qaban karo.

Tallaabada 4-aad: Kor u qaadida codka bulshada ku leedahay nooca CCO-ga si loo hubiyo in ahmiyadaha iyo baahiyaha bulshada ay kalifayaan go'aamada kharash gareynta

Si miisaaniyadda caalamiga ah u shaqeyso, kheyraadka waa in la weeciyo si loo daboolo baahiyaha ugu waaweyn loona xalliyo xaqsoor la'aanta caafimaadka. Hawshan lama qaban karo iyadoo aan la xoojin codka bulshada. Nooca CCO-ga Oregon wuxuu horeyba uga koobnaa istaraatijiyado dhowr ah oo lagula dhaqmayo bulshada, oo ay ku jiraan Goleyaasha La-talinta Bulshada iyo qorsheyaasha qiimeynta caafimaadka bulshada ee loo baahan yahay iyo qorsheyaasha horumarinta caafimaadka bulshada. Isbeddeladii qandaraas ee ugu dambeeyay waxay uga baahdeen CCO-yada inay si wadajir ah u horumariyaan qorsheyaasha horumarinta caafimaadka bulshada ee isbitaalada deegaanka iyo caafimaadka bulshada iyo sidoo kale ururada bulshada iyo qabiilada, taasoo kordhinaysa kala xisaabtanka CCO-ga ahmiyadaha bulsheed ee la wadaago. Hase yeeshe, kharashka dhabta ah ee ku baxa baahiyaha bulshada, xaqsoorka caafimaadka, iyo maalgashiga bulshada ayuu weli sii jiheeyaa CCO-ga; iyo inay CCO-yada kharash gareyn karaan iyo inta ay ku kharash gareeyaan aagaggan ayay weli asal ahaan u taalaa CCO kasta.

Ka-dhaafida xigta ujeedkeedu waa in la dhiso istaraatiijiyadahaan lana sameeyo qaabab cusub oo isla xisaabtan si loo hubiyo in CCO-yada ay awoodda la wadaagaan bulshada, gaar ahaan marka ay timaado maalgashiga xaqsoorka caafimaadka iyo dejinta caafimaadka bulshada. Shaqadani waxay sidoo kale ku lug yeelan doonta istaraatiijiyado kordhinaya helitaanka xogta ku habboon, ee bulshadu ka warqabto. Bulshooyinku way adeegsan karaan xogtan si ay u gaaraan go'aano waxtar u leh bulshadooda oo ugu doodaan kheyraadka lagama maarmaanka u ah horumarinta caafimaadka bulshada.

Tallaabada 5-aad: Dib u habee barnaamijka halbeegga ee Oregon si xaqsoorka u noqdo mabda'a aasaasiga ah ee abaabulka.

Gobolka Oregon hadda wuxuu leeyahay barnaamij halbeeg oo adag oo loogu talagalay Ururada Daryeel ee Isku Xiran, oo ay ku jiraan ka warbixinta joogtada ah ee tayada iyo tallaabooyinka helida adeegga, iyo barnaamijka halbeegga guusha leh ee diirada

saaraya dareenka CCO-ga ee wanaajinaya dhinacyada gaarka ah ee bixinta daryeelka, mahadhada bukaanka, iyo natiijooyinka. Gudaha ka-dhaafida cusub, Oregon wuxuu ku sheegay inuu sii kordhinayo guushan iyagoo isku daraya tallaabooyin diirada lagu saarayo tallaabooyinka kor u qaadaya arrimaha saameeya xaqsoorka caafimaadka.

Si loo sii hubiyo xubnaha Medicaid inay helaan oo ay qaataan daryeel tayo leh, iyadoo ahmiyadda la siinayo kooxaha dadka ah ee ay soo wajahaan xaqsoor la'aanta casriga iyo taariikhiga ah, Oregon wuxuu soojeedinayaa u kala qeybinta barnaamijkiisa halbeegyo ee jira laba qeybood oo casri ah. Labada qeybood ayaa loogu talagalay inay ku fidaan dhinacyada kore iyo sare ee qaabdhismeedka xaqsoorka caafimaadka.

Hal qayb oo ka mid ah barnaamijka dhiirrigelinta ayaa la jaanqaadi doona tallaabooyinka geedi-socodka daryeelka caafimaadka, natiijooyinka, iyo ka-faa'iideysiga qarameed ("halbeegyada hoose"). Halbeegyada hoose waxay diiradda saari doonaan tayada dhaqameed iyo tallaabooyinka helitaanka, oo ay ku jiraan tallaabooyinka u baahan CMS, iyadoo la sii jaanqaaadayso barnaamijka dhiirigelinta tayada CCO-ga ee jira. Qeybta labaad ee barnaamijka dhiirrigelinta waxay ka koobnaan doontaa tallaabo yar oo diirada lagu saarauo arrimaha kor u qaadista ee saameeya xaqsoorka caafimaadka ("halbeegga sare"). Halbeegyadaani waxay diiradda saari doonaan kor u qaadista si loo saxo caddaalad-darrada taariikheed iyo tan casriga ah.

Tallaabada 6-aad: Hubi in habka Oregon ee macaashyada ku saleysan caddeynta uu sare u qaado helitaanka daryeelka casriga ah oo qiimo sare leh, oo ay ku jiraan baahiyaha bulsheed oo caafimaadka la xiriira.

Liiska ahmiyadda leh ee Oregon wuxuu gacan ka geystey hagista maalgashiga daryeelka caafimaadka ee caddaynta ku saleysan tan iyo 1990-dii wuxuuna qayb muhiim ah ka sii yahay nooca Oregon. Oregon ayaa sii wadi doona inuu sahamiyo qaababka lagu horumarinayo liiska ahmiyadda leh si loo kordhiyo maalgashiga kahortagga ah iyo baahiyaha bulsheed ee caafimaadka la xiriira. Oregon sidoo kale wuxuu ka fiirsanayaa sida adeegyada kale ee qiimaha badan, oo sidoo kale loo yaqaano "in-lieu of services," si fiican loogu biirin karo barnaamijka Oregon si loo siiyo CCO-yada dabacsanaan badan oo ay ku buuxiyaan baahiyaha iyo dookhyada xubinta. Shaqadani waxay faa'ido u lahaan doontaa kaabeyaasha caafimaadka bulshada, maalgashiga, iyo khabiirada daryeelka aasaasiga ee kahortagga si loo kordhiyo wanaajinta caafimaadka dadweynaha.

Siyaasadaha iyo Istaraatijiyadaha:

Hoos waxaa ku yaala liiska siyaasadaha iyo istaraatijiyadaha suurtogalka ah. Xeelado badan oo ku cad miisaaniyadda caalamiga ah ayaa sidoo kale lagu taageeraa istaraatiijiyadaha ka-dhaafitaan ee ku jira daryeelka salka ku haya xaqsoorka iyo maalgashiga baltilmaameedsan ee xaqsoorka.

Miisaaniyadaha dabacsan, caalamiga ah ee waara ee dhowra helitaanka xubinta iyo bartilmaameedka xaqsoor la'aanta caafimaadka.

Si dhab ah ahmiyadda CCO-ga loogu weeciyo bixinta daryeelka ugu qiimaha badan ee ku cad heerka kobaca waara, Oregon wuxuu u baahan yahay miisaaniyad caalami ah oo jawaab-celin leh oo mustaqbalka ka sii fikiro. Oregon ayaa higsanaya inuu dejiyo miisaaniyad bilow ah oo macquul ah isagoo adeegsanaya xog sannado badan la ururiyey oo taariikhi ah isla markaana bartilmaameed u ah kobaca mustaqbalka ee barnaamijka CCO-ga. Oregon sidoo kale wuxuu raadin doonaa dabacsanaan si loo adeegsado habab cusub oo lagu qiimeeyo kharashaadka daryeelka caafimaad ee ugu dambeeyay marka heerarka xisaab ahaan macquulka ah loo sameynayo CCO-yada. Hadafku wuxuu noqon doonaa in si fiican loo waafajiyo dhiirigelinta tayada sare leh, daryeelka kharash ee wax ku ool ah. Ugu dambeyntii, Oregon ayaa raadin doona oggolaansho si uu u adeegsado qaabdhismeedyo sicir oo cusub ee bartilmaameedsada macaashyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ahayn, sida taageerada guriyeynta, la siiyo xubnaha maraya isbeddelada muhiimka ah. Oregon wuxuu dadaaladaas ku lammaanayn doonaa istaraatijiyado lagu ilaalinayo helitaanka xubinta iyo tayada daryeelka. Gobolku wuxuu ka faa'iideysan doonaa barnaamijkiisa halbeegga iyo liiska ahmiyadda la siiyay, iyo sidoo kale kormeer adag oo ay ku jiraan jawaab-celin macno leh oo ka timaadda xubnaha iyo bixiyeyaasha.

Tan iyo maanta, lagama maarmaan uma aysan ahayn Oregon ka-dhaafida qawaaniinta dejinta sicirka federaalka si loo gaaro hadafyadiisa. Sida ku cad dib u cusbooneysiinta jirta, Oregon ayaa rajeynaya inuu raadiyo dabacsanaanta qiimeynta kharaadka daryeelka caafimaadka, mar labaad iyadoo aan la codsan ka-dhaafida khaaska ah ee qaanuunka federaalka.

"Helitaanka kheyraadka caafimaadka ee kahortagga leh ayaa fure u ah dhawrista fayoqabka"

Qaab-dhismeedka Tallaabada COVID-19 ee Bulshada Afrikaan Ameerikaanka ah

"...qoysaska caafimaadka qabaan waa inay helaan barnaamijka taageerada dheeraadka ah [kahortagga] waayo waxaan ognahay in nidaamka caafimaad uu muhiim yahay... balse maxaan sameyn karnaaxx si aysan dadku ugu tagin rugta caafimaadka? Maxay noqon karaan qaar ka mid ah barnaamijyada kahortag ee wanaagsan?"

Ray'iga bulshada ee Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee OHA

Isdhexgalka waa mid aad muhiim u ah balse had iyo jeer uma shaqeeyo sidii loogu talagalay; biilasha ayay caqabad ka taagan tahay; helitaanku waa caqabad la taaban karo.

Mowduuca laga soo qaatay kullamada dhageysi ee CCO 2.0

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Xubnaha OHP, tani waxay uga dhigan tahay inay si badan u heelaan adeegyada wax ka qabanaya baahidooda bulsheed ee la xiriirta caafimaadka. Xubnaha leh baahiyaha daryeelka caafimaadka ee sare, tani waxay uga dhigan tahay isuduwid daryeel oo wanaagsan, oo ay ku jirto helitaanka macaashyo dheeraad ah marka ay u wareegayaan kana wareegayaan hay'adaha, sida jeelasha iyo xabsiyada.

U weeci awoodda bulshada si ay u tilmaamaan maalgashiga bulshada

Inkastoo CCO-yada ay u adeegsadeen dabacsanaan miisaaniyadooda si ay ugu jiheeyaan kharaadka dhanka baahiyaha bulsheed ee la xiriira caafimaadka iyada ee loo maro HRS, kharash gareynta ayaa weli hooseeysa marka la barbardhigo daryeelka caafimaadka. Intaa waxaa sii dheer, xaqiiqda ah inuu xaqsoor la'aanta caafimaadka sii socdo wuxuu tilmaam u yahay baahida loo qabo inaan keliya la kordhinin maalgashiga bulshada iyo iskaashiga caafimaadka bulshada, balse ugu dambeyntii la weeciyo dheelitirka awoodeed ee u dhexeeya CCO-yada iyo bulshada. Shaqadani keliya uma baahna dhisidda nooc adag oo ah go'aan qaadashada iyo jiheynta bulshada – waxay u baahan doontaa in lagu dhisidda fikradaha sida tooska uga *yimid* bulshada iyo iska kaashiga si loola dhiso nooc cusub si toos ah *bulshada*. Waxaa naga go'an inaan la shaqeyno dadka ay aadka u saameeyeen caqabadaha si loo abuuro xalal, ay ku jiraan:

- Iyadoo si toos ah loola shaqeynayo hoggaamiyeyaasha Isbahaysiga Xaqsoorka Caafimaadka ee Oregon si ay u wada abuuraan nooc taageeraya isla xisaabtanka oo xoogga saaraya wadaagista awoodda ee macnaha leh ee u dhexeeya CCO-yada iyo bulshada, iyadoo la dhisayo fikradaha ka yimid sharciga la soojeediyey (Xeerka Baalamaanka 3353).
- Siinta ahmiyad adeegyada dhaqan ahaan gaarka ah iyo jawaab-celinta bulsheed leh iyo adeegyada caafimaadka ee wax ka qabta xaqsoor la'aanta caafimaadka, sida taageerada guriyeynta iyo maalgashiyada si loo kordhiyo helitaanka daryeelka dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan habboon.

Tani maxay uga dhigan tahay xubnaha OHP?

Xubnaha OHP, gaar ahaan xubnaha wajahaya xaqsoor la'aanta caafimaadka, tani waxay uga dhigan tahay inay cod dheeraad ah ku yeeshaan go'aamada daryeelka caafimaadka ee iyaga saameeya. Bulshooyinka OHP, tani waxay uga dhigan tahay aayo ka talintooda iyo kharash gareyn ay hormuud ka tahay bulshada ee aqoonsata, is-waafajisa, oo saxda caddaalad darrada taariikheed iyo tan casriga ah.

"Yaa ka fiican inay sheegaan waxa looga baahan yahay bulshada oo aan ka aheyn bulshada?"

"Dadka ku hawlan hawshan waday oo howsha wadeen muddo dheer… Uma baahna qorshe cusub oo istaraatiijiyadeed. Waxaan u maleynayaa inay tahay in qof walba oo horay ay ugu socdeen qorsheyaal ee leh, "Hagaag, sidee ayaan kor ugu qaadi karnaa dhammaan dadkii howsha waday?" Waxaan u maleynayaa in shaqada OHA ay qaban karto hay'ad ahaan ay tahay u-doodista ururada haatan howsha wada."

Ray'iga bulshada ee Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee OHA

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Iska Kaashiga Wacyigelinta Bulshada community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.